


Inta badan dadka uu ku dhacay COVID-19 way bogsadaan



Inta badan dadka uu ku dhacay COVID-19 gabi ahaanba way bogsadaan. Xaaladaha badankood, habka difaaca jirka ayaa si wax ku ool ah ula dagaallama caabuqa, oo haddii aadan calaamado yeelan 48 saacadood, waxaa lagu aqoonsanaya inaad soo kabsatay.

Haddii aad qaadsiiiso fayraska cusub ee Icorona, tani macnaheedu maahan inaad cudurka ku hayn doonto inta ka dhiman noloshada.

Inta badan dadka uu ku dhaco cudurka waxay la kulmaan xanuun yar umana baahna daryeel caafimaad. Haddii aad isku aragto astaamaha COVID-19, tusaale qandho iyo/ama qufac, waa inaad wacdaa dhakhtarkaaga. Ha booqan dhakhtarkaaga ama ha imaan qolka xaaladaha degdega haddii aad leedahay astaamaha COVID-19.

Haddii aad fayraska cusub ee corona (tusaale ahaan, baaritaanka ayaa muujinaya in aad cudurka qaadday), waa in aad ka iska karantiisha dadka kale si aad uga hortagto in aad cudurka ku faafiso dadka kale, oo ay ku jiraan xubnaha kale ee qoyskaaga. Haddii ay kugu adkaato inaad iskarantiisho, tusaale ahaan inaad ku nooshahay xaalad aad u cidhiidhi ah, waxaad la xiriiri kartaa dawlada hoose si aad uga hesho talo ku saabsan suurtagalnimada inaad joogto meel ka baxsan gurigaaga oo aad isku karantiisho.

Haddii aad aad u xanuunsantahay oo aadan hubin inaad u baahantahay isbitaal dhigis, waa inaad wacdaa dhakhtarkaaga ama qaybta xaaladaha degdega ah.